



AABE AYAA UGU OG

Aabayaal, Abtiyaal/Adeero, Aabayaal Aan Dhalin ee Hooyooyinkood Qaba, Awoowayaal...

Dhammaantiin meel gaar ah ayaad ku leedihiin nolosha caruurtiina! Caruurta haysata rag ku lug leh nolol maalmeedkoodga waxay noqdaanonayaan kuwo aad u habaysan oo si fiican ugu qalabaysan guul. Muhiim ayaad tahay! Danayntaada iyo jacaylkaagu waxay samayn doonaan faraq weyn oo muhiim ah.

La Ciyaar Ilmahaaga. Caruurta way jeceshahay marka aad la ciyaarto. Waxay noqon karaan ciyaaraha miiska ama dhulka lagu ciyaaro (sida shaxda, laadhuda, turubka iwm.) ama aad ciyaartaan isboorti, ama si dhib yar oo aan macna weyn lahayn daaradda ama ardaaga isku eryataan. Waxa muhiimka ahi waa wakhtigaaga oo aad siinayso, taasina waa waxa u ilmuhu doonaayo.

Ad-adeyg muuji, hase ahaatee naxariis lahow. Nidaam ama qawaaniin sii caruurtaada, hubina in uu nidaamkaagu uu yahay mid cad. Sharax nidaamkaaga; waa muhiim in ay caruurta fahamto sababta looga doonaayo in ay raacaan qawaaniinta ama nidaamkaa. Ku adkayso in ay qawaaniintaada iyo waxkasta oo aad la samaynayso caruurta ay ahaadaan kuwo joogto ah.

Noqo aabe ay caruurtiisu la hadli karaan. Miyey karaan caruurtaadu in ay kula fadhiistaan oo ay kula falanqeeyaan ama kaala sheekaystaan rajooyinkooda, cabsidooda, riyoooyinkooda ama waxa ay maanka ku hayaan in ay noqdaan mustaqbalka iyo arrimo ku saabsan xidhiidhka ay kula leeyihiin? Caruurta dhammaantood ma kari karaan in ay xidhiidhkaa wanaagsan sameeyaan. Si ay caruurtaadu kuugu fur-furnaato, waxaad u baahan tahay in aad adiguna u fur-furnaato. Taasi kama dhigna in aad ku wareejiyoay culayskaaga caruurtaada, hase ahaatee waxa aad samaynaysaa waa adigoo kala hadla waxyaabo ku saabsan shaqadaada ama arrimo kale oo la xidhiidha nolol maalmeedka. Markay sii weynaadaanba, xasuuaha wakhtiyadaa gaarka ah iyo sheekooyinka way la jiri doonaan si ay dib ugu jaleecdaan.

War-galintan ku socota waalidka waxay si niyad samid leh uga timid Qaybta Isgaadhsiinta Adeegyada Caruurta ee (Franklin County Children Services' Communications Division).
24ka saacadood layn u furan xad gudubka caruurta: 614-229-7000.
childrenservices.franklincountyohio.gov



Protecting Children by Strengthening Families